


# Waxaad heshay Kaarkaaga Vax ee COVID: *Hadda Maxaa Xiga?*



Markaad dhameystirto tallaalkaaga COVID-19, waxaad heleysaa kaarka tallaalka si aad u caddeeyso. Si fiican u ilaali! Waa inaad u ilaalisaa sidaad u ilaalin lahayd kaarkaaga kiridhitka, laysanka darawalnimada ama baasaboorkaaga. Kaarkaagu kaliya maahan wax ku soo xuusiya jadwalka tallaalka: waa diiwaan rasmi ah oo laga yaabo inaad ugu baahato safarka, marin u helka munaasabadaha, iyo suurto gal ah inaad u baahato si aad u qaadato tallaalkada xoojinta ee mustaqbalka.

Ganacsiyo badan oo ka jira Washington ayaa hadda bixinaya dhiiragelino loogu talagalay dadka cadeeya inay soo qaateen tallaalka buuxa sida qiimo dhimis, waxyaabo bilaash ah ama kuraas fiican haddii ay tahay munaasabad. Ilaasho kaarkaaga tallaalka si aad uga faa'iideysato adeegyadan gaarka ah.

## **Halkan waxaa ku yaal talooyin waxtar leh oo ay tahay in maskaxda lagu hayo marka laga hadlayo maareynta kaarkaaga tallaalka:**



- **SII** ku hayso kaarkaaga tallaalka inta u dhexeysa qiyaasaha iyo ka dib.
- **KA** qaad sawirro xagga hore iyo xagga gadaal ee kaarkaaga si aad u haysato nuqul dijitaal ah. Tixgeli inaad iimayl ahaan ugu soo dirto iimaylkaaga, aad album ka samayso, ama aad magac/astan ku darto sawirka si aad si fudud markale ugu hesho.
- **KA** qaad nuqul/koobi haddii aad rabto inaad mid aad iska wadwadato.



- **HA** iska tuurin ama ha iska luminin!
- **HA** dhigin khadka sawir muujinaya kaarkaaga tallaalka. Taas bedelkeed iska qaad sawir kadibna isticmaal **isticaradeena dhijitaalka ah** (Ingiriis keliya ku qoran) adigoo raadinaya #vaccinateWA ama #wadoh! Xusuusnow inaad taag gareeyso @WADepthHealth.
- **HA** saarin warqad adag kaadhkaaga orijinaalka ah. Waxaad taas bedelkeed dooran kartaa inaad warqad adag saarto koobiga kaarkaaga si aad hore ugu qaadato.

## **Maxaa dhacaya haddii aadan haysan/kaa lumo kaarkaaga tallaalka CDC (Xarunta Xakameynta Cudurada)**



Haddii aad meel aad dhigtay garan weydey ama aad lumisay kaarkaagii, ha ka welwelin! Waxaad caddeyn rasmi ah oo la xaqiijiyay oo ah tallaalkaaga COVID-19 ka heli kartaa khadka tooska ah, si bilaash ah. Websaydhka MyIR waa bog goboleed oo rasmi ah oo laga helo caddaynta tallaalka ee gobolka Washington. Si aad u hesho nuqulkaaga, booqo [www.MyIRmobile.com](http://www.MyIRmobile.com) oo isku diiwaangeli si bilaash ah. Haddii aad horeyba u sameysatay akoonka MyIR, waa hagaag!

*\*Fadlan maskaxda ku hay in xaqiijinta diiwaankaaga ee laga helo MyIR laga yaabo inaysan noqon mid degdeg ah, oo isticmaalkiisuna hadda waxay keliya ku kooban tahay luuqada Ingiriiska.*

Si aad u hesho caawinaad xagga luqadda ah, ama caawimaad dheeraad ah si aad u hesho diiwaannadaada, waxaad sidoo kale wici kartaa Gobolka Washington Office of Immunization and Child Profile (Xafiiska Tallaalka iyo Macluumaadka Carruurta) inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah 360-236-3595 ama iimayl ahaan ula xiriir [waisrecords@doh.wa.gov](mailto:waisrecords@doh.wa.gov).